



Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Ref: 1449 /10/1/9/16 الرقمه:

التاريخ Mogadishu, 10/11/2016

- Ku: Guddoomiyaha;
Guddiga Doorashada Dadban ee heer Federaalka
Muqdisho.
- Ku: Guddoomiyaha; Guddiga Doorashada Dadban ee Heer Dowlad-Gobaleed ee Somaliland -
Muqdisho.
- Og: Guddomiyaha Guddiga Xalinta Khilaadka Doorshooyinka
Muqdisho.
- Og: Madaxweynaha;
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.
- Og: Ra'iisul Wasaaraha
Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.
- Og: R/Wasaaraha kuXiggeenka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya,
Muqdisho.
- Og: Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka Federaalka
Muqdisho
- Og: Odayaal Dhaqameedka – Gacansaar
Muqdisho
- Ujeeddo: **Gudbin hannaan doorasho dadban 2016 oo u gaar ah doorashada xubnaha labada
Aqal ee BJFS Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Soomaaliland.**
Mudaneeyaa,

Waxaan halkan idinku soo lifaaqay hannaanka ujeeddada ku xusan oo is-fasiraya.
Ayadoo la tixgelinayo muddada doorashooyinka dadban ee 2016 loo qorsheeyey oo gabaabsi ah
waxaa laydinka codsanaya inaad sida ugu dhaqsiyaha badan uga hawlgashaan fulinta qoddobada
uu hannaankan xeeriyyey.

Naga guddooma salaan diiran iyo qadderin.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS





JUMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Hannaan u gaar ah Doorashooyinka Dadban ee 2016 ay ku imanayaan kuraasta mattalaadda degaan-doorashooyinka Golaha Shacabka Soomaaliya iyo kuraasta Aqalka Sare ay ku yeelanayaan Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Somaaliland oo aan weli qoondo ka helin kuraasta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Muqdisho, 10^{-ka} Nofeembar 2016



HANNAN U GAAR AH DOORASHOOYINKA DADBAN EE 2016

Ayadoo la fulinaayo: Go'aankii Madasha Madaxda Qaranka ku xusan Faqradda 8-aad ee kasoo baxay kulankoodi Baydhabo, 22 -25 Juun 2016, kuna guddoomiyeen in "hannaan u gaar loo dejiyo Doorashada Dadban ee 2016 lagu soo dooranayo xubnaha beelaha kasoo jeeda Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ku yeelanayaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, isla markaana loo xilsaaray in Madaxda Dawladda Federaalka go'aan ka gaaraan;

Ayadoo Mudnaan: La siiyey in goobta doorashoooyinka Dadban 2016 lagu qabto hadba meeshii ay isku raacaan Odayaal Dhaqameedka beelahaas uga jira 135ta Oday ee Qaranka;

Ka dib markii wadatashi loo galay: Raadinta xalka iyo habraaca ugu habboon ee lagu fulin karo doorashoooyinka dadban ee 2016 lagu soo dooranayao kuraasta mattaladda degaan-doorashoooyinka Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ku yeelanay mattalaadda Aqalka Sare iyo habraaca ugu habboon ee lagu soo xuli karo ergooyinka soo dooranaya xubnaha Golaha Shacabka.

Fiiro gaar ah loo yeeshay: In uu soo gabaabsanayso muddado loo qabtay in lagu soo gabagabeeyo Doorashoooyinka Doorashoooyinka Dadban 2016 ee Dalka; iyo;

Ayadoo la fulinaayo go'aannadii Madashu horey u gaartay, lagana fogaanayn habraacyada ay dejiyeen Guddiyada Heer Federaal iyo Heer Dawlad Goboleedyadu, iyo ayadoo la tixgolinaayo mabaadii'da guud ee dhaqan-wanaagga caalamiga ah ee doorashoooyinka,:.


Madaxda Dawladda Federaalka, oo la tashatay Odayaal Dhaqameedka, waxgaradka iyo siyaasiyiinta beelaha, waxay wadajir isku raaceen oo xeeriyeen Qodobbada soo socda:

QAYBTA 1-AAD

Caddayn iyo sugid

Qodobka 1-aad, Caddayn Qoondada Aqalka Sare

Madaxda Dawladda Federaalka, oo ka wakil ah dhammaan xubnaha Madasha Madaxda Qaranka, waxay mar kale caddeynayaan oo hoosta ka xariiqayaan in guud ahaan qoondada kuraasta Aqalka Sare ee la dhisayo 2016 waa mid ku eg



kuna kooban mudda xilhaynta Golaha Sharcidejinta Federaalka ee 2016-2020 kaliya, gaar ahaan kow iyo tobankan kursi ee Aqalka Sare iyo siyaabaha Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Somaliland loogu qaybiyoba waxaa looga gol leeyahay oo keliya in joqraafi ahaan iyo maamul ahaanba ay bulshada Soomaliyeed qaybaheeda kala duwan ay ku wada dhan yihiin Golayaasha Sharcidejinta Federaalka, waaana arrin xal ahaan ku kooban kuna eg doorashada dadban ee 2016, ee ma aha qoondo dastuuri joogto ah oo loo qoondeeyey Somaliland. Qoondada mattaladda ay Somaliland ku yeelan doonto Aqaalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa qodob muhiim ah oo looga xaajoon doonaa kuna madalsan hadba sidii ajendada wadahadalka labada dhinac ay mustaqbalka uga heshiyaan laguna xeerin doona marxaladda dib-u-eegista Dastuurka Federaalka.

QAYBTA 2-AAD:

HANNAAN U GAAR AH DOORASHADA XUBNAHA AQALKA SARE

Qodobka 2-aad

Dhisidda Guddiga Madaxbannaan ee Fulinta

Doorashada Dadban ee Xubnaha Aqalka Sare


1. Qodobkan waxaa lagu dhisay Guddiga Madaxbannaan oo marjac u noqda una gaar ah Fulinta Doorashooyinka Dadban ay ku imanayaan xubnaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaakka 2016 ku mattalaya Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Somaliland, oo halkan ka dibna loogu yeeri doono “Guddiga Fulinta”.
2. Guddiga Fulinta xubnihiisa wuxuu ka kooban yahay toddaba (7) xubin oo laga soo xulo waxgaradka iyo siyaasiyiinta sumcad wanaag ku leh bulshada, oo aan labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka midkoodna musharrax u ahayn.
3. Wada tashi ka dib, Xubnaha Guddiga ku xusan faqradda (1) iyo (2) ee qodobkan waxaa loo magacaabay:
 1. M.ne Jaamac Maxamed Qaalib
 2. M.ne Xusein Ceelaabe Faahiye
 3. M.ne Axmed Saciid Faarax
 4. M.ne Maxamuud Axmed Ismaaciil
 5. M.ne Ciise Ducaale Buun
 6. M.ne Ibrahim Axmed Caabi
 7. M.ne Cabdirizaaq Daahir Xusein



Qodobka 3-aad

Xilalka Awoodaha Guddiga Madaxbannaan ee Fulinta

1. Xilalka iyo awoodaha Guddiga Fulinta waxaa ka mid ah:
 - a. In uu si dheellitiran u cayimo una kala qoondeeyo Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Soomaaliland oo aan weli qoondo ka helin kuraasta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka;
 - b. In uu qabto araajida hubiyona in musharrixiintu buuxiyeen shuruudaha mushrraxnimada Aqalka Sare;
 - c. In uu soojeediyo musharrixiinta u tartamaya xubinnimada Aqalka Sare, ayagoo Kow iyo Tobanka (11) kursi mid walba usoo sharraxaya ugu yaraan laba musharrax;
 - d. In uu hubiyo 30% kuraastaas (oo u dhiganta 3 saddax kursi) ay qoonda ahaan u leeyihii una tartami karaan haween keliya, ayna kuraastaas cayimaan;
 - e. In la tixgeliyo dadka laga tira badan yahay;
 - f. In uu magacyada musharrixiinta buuxiyey shuruudaha u gudbiyo Golaha Xeerka Dhaqanka ku xusan Qodobka 5-aad ee Hannaankan Gaarka ah, oo codeyn ku kala reebaya musharrixiinta;
 - g. In uu Guddiga Doorashooyinka Dadban 2016 ee Heer Federaal u gudbiyo warbixintiisa iyo natijada kama dambaysta ah iyo dhammaan dokumentiga doorashada, oo ay ku qeexan yihiin xildhibaanada ku guuleystay Kow iyo Tobanka kursi ee Aqalka Sare asagoo naql siinaya Madaxweynaha Jumhuriyadda Soomaaliya, Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka iyo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka.
2. Guddigan guntanka kulamadiisa wuxuu ku ansaxayaa markii ay goobjoog yihiin Saddax melood Labo (2/3) tirada guud ee xubnaha Guddiga, go'aannadiisuna waxay ku meelmarayaan wadar oggol intii suurtagal ah, haddiise la waayo waxay ku meelmarayaan aqlabiyyad fudud oo codeyn haldheeri ah.
3. Guddigu markuu xilalkiisa fulinayo wuxuu ilaalinaya mabaadii'da Dastuurka Federaalka, guud ahaan shuruucda dalka iyo nidaamada loo dejiyey



Doorashooyinka Dadban ee 2016, xeer-dhaqameedka iyo soojireenka Soomaaliyed iyo dhaqan-wanaagga cahdiyada caalamiga ah ee doorashooyinka.

4. Guddiga wuxuu kaloo awood u leeyahay inuu dejisto nidaam ama xeer-hoosaad u fududeeya xilgudashadiisa ayadoo aan laga fogaanayn xeer-hoosaadka Golaha sharcidejinta Soomaaliya iyo xeer-hoosaadka Guddiga Doorashooyinka Dadban ee Heer Federaal.

Qodobka 4-aad

Xuquuqda iyo Muddada Xilhaynta Guddiga Madaxbannaan ee Fulinta

1. Guddiga wuxuu yeelanaya xuquuq la mid xuquuqda xubnaha Guddiga Doorashooyinka Dadban 2016 ee Heer Federaal.
2. Muddada xilhaynta Guddigan waxay ku eg tahay kuna dhammaaneysa Toddoba maalmood shaqo ka dib, ka bilaabata maalinta uu magacyada xildhibaanada Aqalka Sare ku guuleystay uu u gudbiyo Guddiga Doorashooyinka Dadban 2016 ee Heer Federaalka.

QAYBTA 3-AAD

Habraaca Doorashada Dadban ee Xubnaha Aqalka Sare

Qodobka 5-aad

Dhisidda Golaha Xeer Dhaqanka

1. Qodobkan waxaa lagu dhisay Golaha Xeer-Dhaqameedka u gaarka ah doorashada Xubnaha kow iyo tobanka ee Aqalka Sare ku yeelanayaan Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Soomaaliland oo aan weli qoondo ka helin kuraasta Aqalka Saree e Baarlamaanka Federaalka, wuxuuna u xilsaaray yahay inuu codeyn ku kala reebo musharrixiinta u tartamaya kow iyo tobanka (11) kursi Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka.
2. Golahan wuxuu ka kooban yahay lix iyo afartan (46) xubin oo ka kala imanaya saddax iyo labaatan (23) Odayaal-Dhaqameedka ka mid ah Saxiiyasha 135ta Oday Dhaqameedka Qaranka oo lagu kordhiyo saddax iyo labaatan (23) xubno laga soo xulay Bulshada Rayadka oo kasoo jeeda muwaaddiniinta Gobollada kor ku xusan.



3. Xubnaha Golahan bulshada rayadka ah ee lagu kordhiyey kuna xusan faqradda 2-aad ee Qodobkan, waxaa si isku dheellitiran Odey-Dhaqamed walba uu usoo magacabaya hal xubin, waana in ay ka mid ahaadaan kuna koobnayn Haweenka, Dhallinyarada, Culamaa'u-Diinta, Ganacsatada, Aqoonyahannada, Suugaanleyda iyo Halabuurayasha. Odey-dhaqameed kasta wuxuu xubinta uu soo magacaabay u gudbinya Guddiga Fulinta Doorashada Aqalka Sare.
4. Golaha Xeer-dhaqameedka waxaa fadhligiisa ugu horreeya isugu yeeraya Guddoomiyaha Guddiga Fulinta Doorashooyinka Aqalka Sare.
5. Muddada Xilhaynta Golahan wuxu ku kooban yahay xil-gudashadiisuna ku eg tahay maalinta Guddiga Fulinta uu natijada kama dambaysta ah ee doorashada uu u gudbiyo Guddiga Doorashooyinka Dadban ee 2016 Heer Federaal

QAYBTA 3-AAD

Habraaca Doorashada Dadban ee Xubnaha Golaha Shacabka

Qodobka 6-aad

Maaraynta Doorashada Xubnaha Golaha Shacabka

1. Habraaca loo marayo doorashada kuraasta mettalaadda Golaha Shacabka ay ku leeyihiin beelaha ku dhaqan Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Somaaliland waxa lagu maaraynaya si waafaqsan habraac Doorashooyinka Dadban ee 2016 ee lagu qabanayo degaan-doorashooyinka dalka oo dhan.
2. Ayadoo la tixgelinayo tala soojeedinta Odayaal Dhaqameedka iyo duruufaha u gaarka ah degaan-doorashooyinka Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Somaaliland, waxaa la guddoomiyey in xarumaha doorashooyinka dadban 2016 ee xildhibaananan Baarlamaanka Federaalka lagu qabto Magaala Madaxda Muqdisho.
3. Sidoo kale waxaa la guddoomiyey in Golaha Ergooyinka u codeynaya Musharrixiinta Golaha Shacabkana loo habeeyo nidaamka iyo qaab-dhismeedka u gaarka ah ay odayaal Dhaqameedka beelaha ku heshiyeen soona gudbiyeen 2^{-dii} Nofeembar 2016, oo halkan ku lifaaqan waana qayb ka mid ah Hannaankan u gaarka ah Degaan-doorashooyinka Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Somaaliland.

4. Kursi walba goonidiisa ayaa loogu codeynaya. Golaha Ergada kursi walba u codeyneysa waa in ay ka koobnaata kow iyo konton (51) xubin. Guntanka Codeyntuna waa in ay goobjoog yihiin kow iyo afartan (41) xubin oo codeynaya.
5. Musharrax walba wuxuu u tartami kara kaliya hal kursi oo beeshiisa ah
6. Guddiga Doorashooyinka Dadban 2016 ee Heer Federaal iyo Guddiga Doorashada Dadban Heer Goboleed u gaarka Degaan-doorashooyinka Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Soomaaliland ayaa u xilsaaran fulinta iyo hirgelinta qodobbadan iyo fududeyn ta wixii tas-hiilaad ah oo ay u baahdaan Guddiga Fulinta Doorashada xubnaha Aqalka Sare, Golaha Xeerdhaqameedka, Odayaal Dhaqameedka iyo ergooyinka loo xilsaaray meelmarinta hawlahan.
7. Dhammaan Odayaash Dhaqanka, Waxgaradka, Siyaasiyiin, Culamaa'u-Diinka iyo qaybaha kale ee bulshada waxaa laga codsanaya inay si gaar ah isaga xilsaaraan dedejinta iyo hirgelinta hawlaha doorashada, ayagoo si buuxda ula shaqeeya hay'adaha Dawladda iyo Guddiyada loo xilsaaray Doorashooyinka Dadban ee 2016, mudnaanta koobaad siiinaya ilaalinta muddada loo qorsheeyey in lagu soo gebagebeeyo doorashooyinka.



M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Baarlamaanka J.F.S

Muqdisho; 10th Nofeembar, 2016



Ref: 1439 /10/1/9/16

التاريخ Mogadishu, 04/11/2016

- Ku: Guddoomiyaha;
Guddiga Doorashada Dadban ee heer Federaalka - Muqdisho.
- Ku: Guddoomiyaha; Guddiga Doorashada Dadban ee Heer Dowlad-Gobaleed ee Somaliland - Muqdisho.
- Og: Guddomiyaha Guddiga Xalinta Khilaadka Doorshooyinka - Muqdisho.
- Og: Madaxweynaha;
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya - Muqdisho.
- Og: Ra'iisul Wasaaraha
Xukuumadda Federaalka Soomaaliya - Muqdisho.
- Og: R/Wasaaraha kuXiggeenka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya,
Muqdisho.
- Og: Odayaal Dhaqameedka – Gacansar -Muqdisho

Ujeeddo: Gudbin Heshiiska Hannaanka u gaarka Degaan-doorashooyinka Gobollada Woqooyinka Soomaaliya oo lagu keenayo ergooyinka doorashada Dadban 2016 ee Golaha Shacabka – Heshiiska Odayaal Dhaqameedka Gobollada Woqooyi ee Soomaaliya.

Mudaneeyaa;

1. Ayadoo la fulinayo faqradda 8aad ee go'aanka madasha Madaxda Qaranka ku gaareen kulankoodii Baydhabo 22-25 Juunyo 2016 kuna saabsan in la txigeliyo daruufaha u gaarka ah deegaan-doorashooyinka Gobollada Woqooyiga Soomaaliya loo dejiyo hanaan u gaar ah oo lagu fuliyo doorashooyinka dadban ee 2016, arrinkan oo loo xilsaaray Madaxda Dowladda Federaalka go'aan ka gaarto.



2. Wuxaan halkan idinku soo gudbinayna Hanaanka Doorashada Dadban ee 2016 oo u gaarka Gobollada Woqooyiga Soomaaliya – Qaybta 1-aad oo loo dejiyey nidaamka ay ku imanayaan Ergooyinka Beelaha degaan doorashooyinka Gobolladaas si ay u doortaan xildhibaannada ay beelahaas ku leeyihiin mattalaadda Golaha Shacabka 2016 - 2020.
3. Nidaamka halkan ku lifaaqan waxaa lagu gaaray wadatashi duubabka Beelahan ugu jira odayaal dhaqameedka Qaranka oo ka mid ah 135ta Odey ee 2012 wax ka soo dhisay Baarlamaanka 9-aad ee Soomaaliya, wadatashigaas oo Xarunta Guddoonka Baarlamaanka Federaalka ka socoday 25th Oktoobar ila 2nd Nofeembar 2016, ayadoo oday walba si madaxbannaan ku gaaray sida ugu wacan uguna fudud uu ku keeni karo ergadiisa go'aan ku gaaray, dowladda Federaalkuna aha keliya fududeyn, takulayn farsamo iyo ilaalinta in intii suuragal ah la raaco hanaanka guud ee u degsan doorashooyinka dadban 2016 ee Qaranka loo qabanayo Golaha Sharciijinka Federaalka Soomaaliya 2016-2020.
4. Saa daraadeed, maadaama muddada loogu talagalay in lagu soo afjaro doorashooyinka uu gabaabsi yahay, waxaa dhammaan Guddiyada iyo Hay'adaha Dowladda u xilsaaran doorashooyinka dadban ee 2016 laga doonayaa inay u hawlgalaan fulita geeddisocodka doorashooyinka iyo nidaamkan u gaarka ah Gobollada Woqooyiga Soomaaliya oo halkan ku lifaaqan, oo hay'ad walba sida ugu dhakhsiyaha badan in ay u hawlgasho gudashada xilka uga abbaaran.
5. Ugu dambayntii, waxaan mahad gaar ah u jeedineyna Odayaasha dhaqanka, sida xilkasnimada iyo hoggaamin wanaagga ay noogala shaqeeyeen xallinta arrintan qarameed oo leh muhimmada gara ah, waxaana ka codsaneyna in ay si gaar isaga xilsaaran tallaabooyinka fulinta ah oday walba u abbaaran

Naga guddooma salaan diirran iyo qadderin gaar ah





Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya

Heshiis Odayaal Dhaqameed

Muqdisho, Nofeembar 2, 2016

Hannaan u gaar ah Beelaha Degaan-doorashooyinka Gobollada Woqooyiga Soomaaliya oo lagu keenayo Ergooyinka Doorashada Dadban ee Golaha Shacabka Soomaaliya – 2016 – 2020.

Annaga oo ka mid ah Odeyaal Dhaqameedkii Qaranka ee 135ta halkan hoose ku saxiixan kana soo jeedda deegaan doorashooyinka degmooyinka Gobollada Waqooyiga Soomaaliya, waxaan:

ciddii ay khuseyso u cadeynaynaa

In wada tashi qottadheer ka dib aan si wadar oggol ah isku waafaqnay iskuna wada raacnay in hannaankan u gaarka ah ee lagu keenayo ergooyinka beelaha degaan-doorashooyinka kor ku xusan, oo soo dooran doona kuraasta mettalaada beel walba ku leedahay Golaha Shacabka Soomaaliya ee 2016-2020 – oo halkan ku lifaaqan, si waafaqsan Go'aankii Madasha Madaxda Qaranka ku xusan Faqradda 8-aad ee kasoo baxay kulankoodi Baydhabo, 22 -25 Juun 2016.

| No | Magaca duubka dhaqanka | Beesha | Sixiixa |
|----|-------------------------------------|-----------------------|---|
| 1 | Suldaan Xuseen Nuur Xersi | Samaroon – M. Case |  |
| 2 | Suldaan Abiib Sh. Maxamuud | Samaroon H/Caffaan |  |
| 3 | Suldaan Diiriye Geelle Cali | Samaroon – M. Case |  |
| 4 | Suldaan Maxamed Aadan Ashkir | Samaroon-Makahijil |  |
| 5 | Suldaan C/qani C/laahi Maxamed Food | Habar yonis |  |
| 6 | Suldaan Caydaruus Saalax Ibraahin | Habar yoonis |  |
| 7 | Suldaan Maxamed Suld.Xasan Bulbul | Habar Yoonis |  |



| | | | |
|----|--|-------------|-------------------|
| 8 | Suldaan Saciid Maxamed Aadan C/laahi Ducaale | Ciidagale | <i>Suldaan</i> |
| 9 | Xasan Muxamed Maax | Ciidagale | <i>Xasan</i> |
| 10 | Boqor Maxamed Jaamac Suldaan Cumar | Habar Jeclo | <i>Boqor</i> |
| 11 | Suldaan Siciid Diriye Maxamed Aw Aadan | Habar Jeclo | <i>Suldaan</i> |
| 12 | Suldaan Faarax Max'ud Max'ed Buraale | Habar Jeclo | <i>Faarax</i> |
| 13 | Suldaan Ibraahim Caraale Cabdalla | Arab | <i>Ibraahim</i> |
| 14 | Suldaan Cumar Cali Caraale Yuusuf | Arab | <i>Cumar</i> |
| 15 | Suldaan Cabdullahi Yusuf Xasan | Habar Awal | <i>Cabdullahi</i> |
| 16 | Suldaan Maxamud Haaruun Xasan | Habar Awal | <i>Maxamud</i> |
| 17 | Suldaan C/raxmaan Jaamac Maxamed | Habar Awal | <i>Raxmaan</i> |
| 18 | Suldaan Cali Cabdi Saciid Guuleed | Toljeclle | <i>Cabi</i> |
| 19 | Suldaan Caaqil Maxamud Jaamac Boqore | Ciise | <i>Caaqil</i> |
| 20 | Caaqil Maxamed Ibraahin Sahal Bahdoon | Ciise | <i>Ibraahin</i> |
| 21 | Suldaan Caaqil Faysal Boodhle Codaawe | Ciise | <i>Faysal</i> |
| 22 | Suldaan Xersi Xaaji Gaboobe | Muse Dheri | <i>Xersi</i> |
| 23 | Suldaan Axmed Jamac Xirsi | Muse Dheri | |

SUGID

Waxaan si sugar u caddaynaya in Qoraalkan horteyda lagu saxiixa ayadoo dhammaan saxiixayaasha kor ku xusan ay wada goobjoog ku yihiin Xafiiska Guddoonka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaan"

Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka

Muqdisho, 02/11/ 2016




Lifaaqa:

Hannanka loo qorsheeyey Ergooyinka dooranaya Xildhibaanada Golaha Shacabka

| Degaan-Doorashooyinka G/Woqooyiga Soomaaliiya /No# | Mgaca Beesha | Wadarta Kuraasta | Jilib Hoosaadka | Tirada Ergada | Magaca Oday Dhaqameedka u xiisaaran keenista Ergada | Degaan- Doorashooyinka Gobollada |
|--|--------------|---------------------|-----------------------------------|------------------|--|--|
| 1. | Habar Awal | 6 | Sacad Muuse | 51 | Suldaan Cabdullahi Yusuf Xasan (Sacad Muuse 2 Kursi) | Degaannada W/Galbeed |
| | | | Sacad Muuse | 51 | Suldaan Maxamud Haaruun Xasan (Sacad Muuse 2 Kursi) | Degaannada W/Galbeed |
| | | | Cise Muuse | 51 | Suldaan C/raxmaan Jaamac Maxamed (Ciise Muuse 2 Kursi) | Degaannada Waqooyi Galbeed/Togdheer |
| | | | Muuse Ismaaciil & Muuse Carre | 51 | Suldaan Caydaruus Saalax Ibraahin (Muse Ismail & Muuse Carre 2 Kursi) Ceergaabo | Degaannada Ceerigaabo |
| | | | Cabdalla Ismaaciil & Sacad Yoonis | 51 | Suldaan Maxamed Suid.Xasan Bulbul (Sacad Yoonis -1 Kursi Sanag & Cabdalla Ismaaciil 1 Kursi) | Degaannada Togdheer |
| 2. | Habar Yoosin | 6 | Cali Saciid & Isxaaq | 51 | Suldaan C/qani C/laahi Maxamed Food (Cali Saciid 1 Kursi & Isxaaq 1 Kursi) | Degaannada Woqooyi Galbeed |



| Degaan-Doorashooyinka G/Woqooyiga Soomaaliya /No# | Mgaca Beesha | Wadarta Kuraasta | Jilib Hoosaadka | Tirada Ergada | Magaca Oday Dhaqameedka u xilsaaran keenista Ergada | Degaan-Doorashooyinka Gobollada |
|---|--------------|------------------|-----------------------------|---------------|--|---------------------------------|
| 3. | Ciidagale | 4 | Abokor Muuse | 51 | Xasan Muxamed Maax (Abokor Muse 1 Kursi & Dhammal Aadan 1 Kursi) | Degaannada Woqooyi Galbeed |
| | | | Cabdiraxmaan Muuse | 51 | Suldaan Maxamed Aadan Cabdullahi (Reer lidle 1 Kursi & Danwadaago 1 Kursi) | Degaannada Woqooyi Galbeed |
| 4. | Samaroon | 9 | Maxamed Case | 51 | Suldaan Xuseen Nuur Xersi & Suldaan Diiriye Geele Cali (Maxamed Case 3 Kursi) | Degaannada Awdal |
| | | | Makaahil | 51 | Suldaan Maxamed Aadan Ashkhir (Makaahil 3 Kursi) | Degaannada Awdal |
| 5. | Habar Jeclo | 6 | Habar Caffaan | 51 | Suldaan Abiib Sh. Maxamuud (Habar Caffaan 3 Kursi) | Degaannada Awdal |
| | | | Maxamed Abokor | 51 | Suldaan Siciid Diriye Maxamed Aw Aadan (Maxamed Abokor 2 Kursi) | Degaannada Togdheer |
| | | | Muuse Abokor | 51 | Boqr Maxamed Jaamac Suldaan Cumar & Suldaan Faarax Max'ud Max'ed Burraale (Muse Abokor 2 Kursi) | Degaannada Sanaag |
| | | | 1 kursi Muse Abokor iyo (1) | 51 | Ergo 25 Muuse Abokor ah iyo 25 Ergo Maxamed Abokor: Boqr Maxamed Jamac, Suldaan Saciid iyo Suldaan Faarax Max'ud Max'ed Burraale | Degaannada Togdheer/Sanaag |




| | | | | | | |
|---|--------------|-------------------|-------------------|---------------|---|---------------------------------|
| Degaan-Doorashooyinka G/Woqooyiga Soomaaliya /No# | Mgaca Beesha | Wadarita Kuraasta | Jilib Hoosaadka | Tirada Ergada | Magaca Oday Dhaqameedka u xilsaaran keenista Ergada | Degaan-Doorashooyinka Gobollada |
| 6. | Toljecllo | 1 | Toljecllo | 51 | Suldaan Cali Cabdi Saciid Guuleed (Toljecllo 1 Kursi) | Degaannada W/Galbeed |
| | | | Arab 1aad 2 Kursi | 51 | Suldaan Ibrahim Caraale Cabdalla (2 Kursi) | Degaannada W/galbeed |
| | | | Arab 2aad 2 Kursi | 51 | Suldaan Cumar Cali Caraale Yuusuf (2 Kursi) | Degaannada W/galbeed |
| 7. | Arab | 5 | | 51 | Suldaan Ibrahim Caraale iyo Suldaan Cumar Cali Caraale Yuusuf (waxay soo xulayaan min 25 ergo oo ka mid ergooyinkii hore u doortay 4ta Kursi si ay u wada doortaan Kursiga 5aad | Degaannada W/galbeed |
| | | | Arab 3aad 1 Kursi | 51 | W/Caaqil Faysal Boodhle Caddaawee (Horrone 1 Kursi, Forlabe 1 Kursi, Walaaldone 1 | Degaannada Awdal |
| | | | Dalool 3 Kursi | 51 | | |
| 8. | Ciise | 8 | | | Caaqil Maxamud Jaamac Boqore – Sultan Xersi Xaaji Gaboobe iyo Maxamed Ibrahim Sahal Bahdoon (Abgal/Ceeyey) 5 Kursi Mamaase iyo Will Muuse | Degaannada Awdal |
| 9. | Muuse Dheri | 1 | Muuse Dheri | 51 | Suldaan Ahmed Jammaal | |



FIIRO GAAR AH:

- 1) Musharrax walba wuxuu u tartami kara keliya kursiga beeshiisa ku leedahay Mattalaadda GolahaShacabka Soomaaliya;
- 2) Kursi walba goonidisa ayaa loogu codeynaya. Golaha Ergada kursi walba u codeyneysa waa in ayKa koobnaataa kow iyo konto (51) xubin, guntanka codeyntuna waa in ay goobjoog yihii ugu yaran kow iyo affartan (41) oo codeynaya;
- 3) Musharrax walba wuxuu u tartami kara hal kursi keliya oo beshiisa ah.
- 4) Ayadoo la tixgelineayo duruufaha gaarka ah ee deegaan-doorashooyinkan, Hannaankee ergooyinka lagu keenayo oo u gaarka ah Gobollada Woqooyiga Soomaaliya, waxaa si toos ah usoo dejiyey duubka beel walba uga jira Odayaal Dhaqamededka Qaranka 135ta ee 2012.
- 5) Hannaka waxaa loo adeegsanaya keliya doorashooyinka Dadban ee 2016 ee Gobollada Woqooyiga Soomaaliya.



Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka

Muqdisho, 02/11/2016